




# Hannaanka KouluKunnossa ee wax ka qabashada maqnaanshaha

## Maxay tahay arrinta laga hadlayo?

Hannaanka KouluKunnossa ee wax ka qabashada maqnaanshaha waa hannaan waxqabad oo lagu taageerayo ku dhegidda dugsiga, la socoshada ka maqnaanshaha dugsiga wax ka qabashada maqnaanshaha, Hadafka hannaanku waa taageeridda waxbarashada, koritaanka iyo nololwanaagga ardayga.

Ku dhegidda dugsiga waxaa loola jeeday mowqifka iyo u hoggaansamidda dugsi-dhigashada cunugga iyo ardayga. Waxaa ku dhegidda dugsiga saameyn ku leh waayo-aragnimada dhinaca dareen ee dugsiga la xiriira,



ka qayb ahaanshaha dugsiga iyo xoogsaaridda waxbarashada iyo dugsi-dhigashada. Ku dhegidda dugsigu waxay ka hortagtaa maqnaanshiyaha waxayna sare u qaaddaa waxbarashada.

Waxaa si waafaqsan hannaanka islamarkaana joogto ah dugsiga dhexdiisa loogu taageerayaa joogitaanka ardayga islamarkaana si qorshaysan wax looga qabanayaa maqnaanshaha. Si waafaqsan sharciga waxbarashada aasaasiga ah ayuu hannaanka wax ka qabashada ka maqnaanshaha dugsigu uu dugsiga iyo qoyskaba ku hagayaa in ay wakhti hore waxqabtaan. Waxaa ku jira taageeridda ku dhegista dugsiga iyo ka hortagga maqnaanshaha, wakhti hore oo wax laga qabto arrinta iyo caawimaad xooggan.

## **Maxay tahay sababta loo isticmaalayo hannaanka?**

Maqnaanshuu waxay saamayn ku yeeshaa waxbarashada iyo nololwanaagga ardayga. Sidaas darteed waa in ardayda lagu caawiyo laguna taageero dugsi-dhigashada. Jawiga wanaagsan ee dugsiga, la kulmidda danaynta leh iyo wax ka qabashada dhibitaanka ayaa aasaas ah u sameeya joogitaanka iyo ku dhegidda dugsiga. Waxaa caawimaadda joogtada ah ee ku dhegista dugsiga waxaa lala sameynaya maalin dugsiyeed kasta adayda oo dhan. Wadashaqeynta u dhexeysa guriga iyo dugsiga ayaa door muhiim ah oo gaar ah ku leh taageeridda dugsi-dhigashada, ka hortagga maqnaanshaha iyo wax ka qabashada maqnaanshiyaha dhici kara. Arrinta xoogga lagu saarayo waxqabadka hannaanka waafaqsan waa taageeridda ku dhegista dugsiga iyo kahortagga maqnaanshiyaha.

Maqnaanshiyo waxaa lagu xisaabiyyaa dhammaan maqnaanshiyaha ardayda ee fasax leh iyo kuwa aan fasaxa lahayn. Wakhti hore oo wax laga qabto maqnaanshiyuhu waa danayn. Waa in si fudud looga hadlaa maqnaanshiyaha. Macallimiinta ayaa si firfircooni leh ula soconaya tirada maqnaanshiyaha. Ujeedada wakhti hore wax ka qabashadu waa ka salgaaridda xaaladda ardayga iyo in ay suuragal tahay in uu caawimaad u baahanyahay. Sababaha maqnaanshuu waa kuwa inta badan noocyoo badan ka salgaariddooduna waa mid mudnaanta

koowaad leh, si ardayga loogu caawiyo habka uu u baahanyahay. Waa muhiim in la fahma muhiimadda uu hoogitaanku u leeyahay waxbarashada iyo nololwanaagga iyo sida ay maqnaanshuhu u tahay mid halis keeneysa.

### **Sidee hannaanka loo isticmaalaya?**

Hannaanka wax ka qabashada maqnaanshiyaha waxaa lagu qeexay marxalado kala duwan oo waafaqsan tirada maqnaanshaha, kuwaas oo wax looga qabanayo maqnaanshiyaha ardayga. Marxaladaha kala duwan waxaa lagu sharraxayaa waxqabadyada iyaga ku habboon iyo qolooyinka lagala shaqaynayo. Waxaa hannaanka lagu xoojinayaa wajihidda iyo dhegeysiga gaarka ah ee ardayga, la tashiga daryeelka ardayda iyo wadashaqeynta xirfadaha badan ku salaysan. Wadashaqeynta xiradda badan ku salaysan waxaa loola jeedaa, in xirfadlayaasha laamo kala duwan ay samaynayaan wadashaqeyn ku salaysan baahiyaha ardayga. Xirfadlayaashan ayaa noqon kara tusaal ehaan macallinka fasalka, macallinka gaarka ah, sooshalka dugsiga, cilmu-nafsiyaqaanka, kalkaalizada caafimaadka, hagaha sooshalka iyo ama sooshallad.

Waxaa maqnaanshiyaha ardayga markasta wax laga qabtaa, marka uu welwel yimaad, laakiin ugu dambeyn marka lagu jiro marxaladahan:



#### **Wax ka qabashada wakhtiga hore ah**

- Ardayga wuxuu **12:kii todobaad ee la soo dhaafay haystaa maqnaanshiyo 10 % ah.**
- Tani waxay ka dhigantahay dhinaca **dugsiga hoose qiyaastii 30 saacadood iyo dugsiga dhexe oo ah 40 saacadood.**
- Marka ay tirada saacadaha maqnaanshaha la dhaafo, macallinka ayaa ardayga la hadlaya gurigana la xiriiraya. Guriga ayaa si wadajir ah loogala baaraandegayaa, in ardaygu u baahanyahay in laga caawiyo waxbarashada ama ku dhegidda dugsiga. Haddii caawimaad loo baahanyahay, waxaa si wadajir ah loo qorshaynayaa hababka caawimaadda loo hirgelinayo. Wadashaqeynta xirfadaha badan waxaa la samaynayaan haddii loo baahdo inta marxaladdan lagu jiro. Waxaa laga heshiinayaa la socoshada arrinka waxaana la xaqijinayaa, in ardaygu ka faa'iido waxqabadyada taageerada ah ee lagu heshiyyay.



## Waxqabadyada xooggan iyo caawimaadda

- Ardayga wuxuu **12:kii todobaad ee la soo dhaafay haystaa maqnaanshiyo 20 % ah**
- Tani waxay ka dhigantahay dhinaca **dugsiga hoose qiyaastii 50 saacadood iyo dugsiga dhexe oo ah 70 saacadood.**
- Marka ay tirada saacadahan maqnaanshaha la dhaafo, waxaa la samaynayaa haddii loo baahdo iyadoo lagu salaynayo oggolaanshaha ardayga iyo/ama waalidka koox khubaro ah oo qaybo bada ka kala socda. Kooxa kubarada ah ee laamaha badan ka kala socda ayeey xirfadlayaal kala duwan uga shaqaynayaan sidii loo caawin lahaa ardayga. Ujeedada kooxdu waa ka salgaaridda baahida caawimaadda ardayga iyo in ay ka heshiiyaan nooca caawimaadda ah ee ardayga loo fidinayo. Waxaa haddii loo baahdo kooxda khubarada ah ee laamaha badan laga qaybgelinayaa ka sokow ardayga, waalidka iyo macallinka tusaale ahaan sooshalka dugsiga, cilmu-nafsiyaqaan, kalkaalisada caafimaadka ama macallinka gaarka ah. Waxaa kulanka looga heshiinayaa hal qof oo dugsiga ka socda oo qaadaya mas'uuliyadda xiriirada u dhexeeya xubnaha kooxda iyo ugu yeerista kooxda kulanka xiga. Qofka mas'uulka ah ayaa sidoo kale la soconaya sida ay caawimaadda ardaygu dugsiga uga hirgashay. Waxaa caawimaadda la qorshaynayaa markasta iyadoo la dhegeysanayo ardayga iyo waalidka qoyskana la taageerayo.



## Haddii ay maqnaanshiyuhu sii socdaan ...

Maqnaanshiyaha ayaa mararka qaar sii socon kara, xittaa iyadoo ardayga loo caawiyay qaab lagu heshiiyay. Mas'uulka dugsiga ayaa markaas xaqiijinaya in sababaha keenaya maqnaanshiyaha si dhab ah looga salgaaray iyo in xaaladda ay wadajir ah isula fahamsan yihiin guriga, dugsiga iyo xirfadlayasha hawsha qaybta ka ah. Waxaa la samaynayaa qorshe ah, sida loo taageeri karo in ardaygu dugsiga ki soo laabto. Habab dhinacyo badan oo wakhti dheer ah ayaa loo isticmaalayaa waxqabadyada caawimaadda ah ee dugsiga. Mas'uulka ayaa si dhow ula shaqaynaya ardayga iyo waalidka. Si firfircooni leh ayuu mas'uulku ula soconayaan xaaladda ardayga. Xirfadlayasha

ardayga caawinaya ayaa xoojinaya wadashaqeyntooda. Doorkooda caawimaad siinta iyo mas'uuliyaddooda marka ay caawimaadda bixinayaa ayaa la faahfaahinayaa. Dugsiga ayaa sidoo kale si toos ah ula xiriiraya ardayga. Waxaa la suuragelinayaa qabanqaabinta waxbaris aan xaddidnayn.



## **Arday kasta waa muhiim!**

Agabka caawimaadda: [koulukunnossa.fi](http://koulukunnossa.fi)